FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL BULLETIN
الجـــريـــدة الـــرسميـــة
EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 1aad** Bilaha Jannaayo – Luulyo 2011

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka biaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoriaanku waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# FAAFINTA RASMIGA AH

# EE

# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

# BILAHA
# Jannaayo – Luulyo

# 2011

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad — Muqdisho, 1 Jannaayo 2011 — L. 1

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

### XEER

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA Lr. 002, Taariikh 01/01/2011** - ***Oggolaansho fulin Xukun dil ah*** — **Bog. 3**

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 003, taariikh 01/01/2011** – ***Oggolaansho fulin xukun dil ah*** — **» 4**

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 005, taariikh 01/01/2011** – ***Oggolaansho fulin xukun dil ah*** — **» 5**

**PRESIDENTIAL DECREE, SOMALI REPUBLIC- Lr. 006/ taariikh 3 Jan. 2011 –** ***Appointment of a special presidential envoy*** » 6

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 015, taariikh 09/01/2011 –** ***Cafis Maxbuus*** » 7

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 016, taariikh 09/01/2011 –** ***Wareejin Sarkaal*** » 8

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 017, taariikh 09/01/2011 –** ***Magacaabid Agaasimaha Guud Madaxtooyada*** » 8

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 018, taariikh 09 Jan. 2011 –** ***Magacaabis Maareeye Shirkad*** » 9

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr. 019, taariikh 09/01/2011 –** ***Dallacsiin Sarkaal*** » 10

**XEER MADAXWAYNAHA J. SOOMAALIYA - Lr.020, taariikh 09/01/2011 –** ***Dallacsiin Sarkaal*** » 11

---

## BOGGA SEDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH**

***W. M***

**XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA,**
**Lr. 002, taariikh 01/01/2011**
**Oggolaansho fulin xukun dil ah**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qod.39aad, 44aad ee Axdiga KMG ee Soomaaliya

**Markuu arkay:** Qodob. 75aad, faqradiisa 1aad e ee Dastuurkii 1961kii

**Markuu arkay:** Qod. 47aad, Xeerka Habka Ciqaabta ee Ciidanka QS

**Markuu arkay:** Warqadda LR/M/CQS/293/ 2010 ee 14/12/2010 ee Xeer Ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida ku codsanayo Fulin Xukun Dil toogasho ah oo MCQ ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Mawliid Max'ed Xasan, Xukun LR. M/CQS/503/2010 ee 14/12/2010

Wuxuu soo saaray xeerkan

**Qod. 1aad**

Waxaa la oggolaaday Fulinta Xukunka dilka toogashada ah ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Mawliid Max'ed Xasan.

**Qod. 2aad**

Xukunkan lagu oggolaaday qod. 1aad ee xeerkan Fulintiisa iyo dhameystirka hab dhaqangalkiisa waxaa si gaar ah ugu xil saaran Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

Muqdisho: 01/01/2011

*Shariif Sheekh Axmed*

Madaxweynaha J. Soomaaliya

**XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA,**
**Lr. 003, taariikh 01/01/2011**
**Oggolaansho fulin xukun dil ah**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Markuu arkay: Qod.39aad, 44aad ee Axdiga KMG ee Soomaaliya

Markuu arkay: Qodob. 75aad, faqradiisa 1aad e ee Dastuurkii 1961kii

Markuu arkay: Qod. 47aad, Xeerka Habka Ciqaabta ee Ciidanka QS

Markuu arkay: Warqadda LR/M/CQS/294/ 2010 ee 14/12/2010 ee Xeer Ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida ku codsanayo Fulin Xukun Dil toogasho ah oo MCQ ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Cantoob Carabow Caddaan, Xukun LR. M/CQS/50/2009 ee 18/12/2009

Wuxuu soo saaray xeerkan

**Qod. 1aad**

Waxaa la oggolaaday Fulinta Xukunka dilka toogashada ah ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Cantoob Carabow Caddaan.

**Qod. 2aad**

Xukunkan lagu oggolaaday qod. 1aad ee xeerkan Fulintiisa iyo dhameystirka hab dhaqangalkiisa waxaa si gaar ah ugu xil saaran Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

Muqdisho: 01/01/2011

*Shariif Sheekh Axmed*

Madaxweynaha J. Soomaaliya

**XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA,**
**Lr. 004, taariikh 01/01/2011**
**Oggolaansho fulin xukun dil ah**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Markuu arkay: Qod.39aad, 44aad ee Axdiga KMG ee Soomaaliya

Markuu arkay: Qodob. 75aad, faqradiisa 1aad e ee Dastuurkii 1961kii

Markuu arkay: Qod. 47aad, Xeerka Habka Ciqaabta ee Ciidanka Qalabka Sida.

Markuu arkay: Warqadda LR/M/CQS/533/ 2010 ee 14/12/2010 ee Xeer Ilaaliyaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka sida ku codsanayo Fulin Xukun Dil toogasho ah oo MCQ ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Cabdicasiis Muxiyadiin Gacal, Xukun LR. M/CQS/295/2009 ee 14/12/2009

**Wuxuu soo saaray xeerkan**

**Qod. 1aad**

Waxaa la oggolaaday Fulinta Xukunka dilka toogashada ah ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ku xukuntay Gacan ku dhiigle D/le Cabdicasiis Muxiyadiin Gacal.

**Qod. 2aad**

Xukunkan lagu oggolaaday qod. 1aad ee xeerkan Fulintiisa iyo dhameystirka hab dhaqangalkiisa waxaa si gaar ah ugu xil saaran Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

MUQDISHO: 01/01/2011

*Shariif Sheekh Axmed*

Madaxweynaha J. Soomaaliya

**PRESIDENTIAL DECREE, SOMALI REPUBLIC- Lr. 006/**
**taariikh 3 Jan. 2011**
**Appointment of a special presidential envoy**

PRESIDENT OF THE REPUBLIC OF SOMALIA

**AFTER HAVING SEEN: -** Article 13 Paragraph (1), letter (E) Article 39, paragraph 2, Article 44 letter "D" and article 71, section 2 of the Transitional Federal Charter of the Somali Republic, Article 4.2, Section 2,

**REALIZING: -** The need for appointing a Special Presidential envoy.

**CONSIDERING: -** **The qualification and the experience of the appointee**

**DECREED THE FOLLOWING:**

**First Article**

On the date the President signs this decree, Mohamud Ali Hashi, is appointed as a Special envoy of the president of Somalia on key national and international issues including, but not limited to, international relations, national security, reconciliation and national economic recovery.

**Second Article**

This decree takes effect on the day it is signed by the president of Republic of Somalia and will be published in the official register of the Republic.

MOGADISHU 02/01/2011

President of the Republic of Somalia

*Sharif Sheikh Ahmed*

**XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA- Lr. 015, taariikh 09/01/2011**
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qodobka75aad, faqradda laad Xarafka "J" ee Dastuurka 1961.

**Markuu arkay:** Qodob. 39aad iyo 44aad ee Axdiga KMG

**Markuu arkay:** Codsiga chellada oo ku saabsan in cafis loo fidiyo Maxbuus Cabdi Ayaanle CabdiRaabi oo ku xiran Xabsiga dhexe

**Wuxuu soo saaray xeerkan**

**Qod. 1aad**

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay Ogosto 31, 2010 waxaa cafis loo fidiyay Maxbuuska magaciisa hoos ku qoran yahay:

1. Maxbuus Cabdi Ayaanle CabdiRaabi ina Ardo Cabdi Cawil

**Qod. 2aad**

Xeerklan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo madaxweynaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho: 09/01/2011

*Shariif Sheekh Axmed*

Madaxweynaha J. Soomaaliya

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr. 016, taariikh 09/01/2011 – Wareejin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**MARKUU ARKAY:** - Qodobka 39aad iyo Qodobka 44aad Axdiga FKMG

**MARKUU ARKAY:** - Soo jeedinta Taliyaha Guutada Ilaalada Madaxtooyada Lr. TGILM/A2/1/4/35/2010 summad, taariikh 19/10/2010 Muqdisho

**Wuxuu soo saaray Xeerkan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Dhamme Maxamed Maxamuud Axmed (Afweyne) laga soo wareejiyay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (Ciidanka Guutada Ilaalada Madaxtooyada) waxaana loo soo wareejiyay Ciidanka Nabad Sugidda Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO 9/01/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr. 017, taariikh 09/01/2011 Magacaabid Agaasimaha Guud Madaxtooyada**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**MARKII UU ARKAY:** Qodobka 39aad farqada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "E" ee Axdiga KMG

**KADDIB MARKII AY BANNAANAATAY**: Xilkii/ Jagadii Madaxa Xafiiska Madaxweynaha

**Markuu arkay:** in ay jrito baahi loo qabo dhameystirka qaab dhismeedka Madaxtooyada, ayna lagama maarmaan tahay in la magacaabo Madaxa Xafiiska Madaxweynaha

**Markuu tixgeliyay:** Aqoonta iyo waayo-aragnimada Mudanaha jagooyinka soo socda loo magacaabayo

Wuxuu soo saaray Xeerkan Maamul.

**Qodobka 1aad**

Marka uu madaxweynuhu saxiixi Xeerkan waxaa Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada loo magacaabay Mudane Abshir Maxamed Axmed.

MUQDISHO 9/01/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr. 018, taariikh 09 Jan. 2011 – Magacaabis Maareeye Shirkad**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 13aad, Faqradda (1) Xarafka (E), Qodobka 39aad, Faqrada 2aad, qodobka 44aad Xarafka "D" iyo qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S

**Markuu garwaaqsaday:** In ay jirto baahi loo qabo in loo magaaabo Maareeye Shirkadda Qaran ee Kalluumaysiga (SHIFCO) si loo soo nooleeyo hawlihii shirkadda

**Markuu tixgeliyay:-** Aqoonta iyo khibradda Maamulka loo magacaabayo xilkaasi

**Wuxuu soo saaray xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan saxiixo waxaa mudane Ibraahim Cabdullaahi loo magacaabay in uu noqdo Maareeyaha Shirkadda Qaran ee Kalluumaysiga (SHIFCO).

**Qodobka 2aad**

Dikreetadan waxaa lagu soo saarayaa FaafintaRasmiga ah ee Jamhuuriyada

MUQDISHO 9/01/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr. 019, taariikh 09/01/2011**
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalka mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa X/Le Nasteexo Xasan Maxamed loo magacaabay Darajada L/X/le

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 9/01/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J. SOOMAALIYA- Lr. 020, taariikh 09/01/2011**
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalku mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa G/le Sare Xuseen Siyaad Faarax (Qoorgaab) loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 9/01/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 1aad** Muqdisho, 1 Febaraayo 2011 L. 2

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 021, taariikh 09/02/2011;
**Dallacsiin Sarkaal** **Bog.** 12

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 031, taariikh 05/02/2011
**Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka J.S** » 13

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 032, taariikh 05/02/2011
**Magacaabid Wasiir ku xigeen Wasaaradda Arrimaha Dibadda** » 13

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 033, taariikh 05/02/2011
**Magacaabid Agaasimaha Guud Wasaaradda Maaliyadda** » 14

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 037 taariikh 15/02/2011
**Burrin iyo dib uga noqosho Xukun** » 15

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 038 taariikh 16/02/2011
**Cafis Maxbuus** » 16

XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 052, taariikh 23/02/2011
**Dallacsiin Sarkaal** » 17

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 053 taariikh 24/02/2011
**Cafis Maxbuus** » 17

---

## BOGGA SEDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### *W. M*

---

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 021, taariikh 14/02/2011;**
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalku mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Yuusuf Maxamed Siyaad (Indhacade) loo qiimeeyay oo loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 14/02/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 031, taariikh 05/02/2011

**Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka J.S**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad faqrada 2aad, qodobka 44aad Xarafka "D", iyo Qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federaalka KMG ee J.S.

**Markuu arkay: -** Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee taariikh 12/06/1962

**Markuu hubsaday:-** Warqadda soo gudbinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee ka soo baxday 'Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo ah Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamada Sare Summad Lr. XRW/00000.201.11 taariikh 30/01/2011, loona magacaabay Mudane Xuseen Cabdi Eilmi in uu noqdo

**Markuu dareemay:-** In ay jirto baahi loo qabo dhameystirka Qaab-dhismeedka Nidaamka Garsoorka Soomaaliyeed & Danta Guud ee Caddaaladda.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu xeerkaan saxiixo ayaa waxaa Mudane Xuseen Cabdi Cilmi loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee dalka J.S.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Guddoomiyaha ah waxa uu xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga Sare ku xusan & Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO 05/02/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 032, taariikh 05/02/2011

**Magacaabid Wasiir ku xigeen Wasaaradda Arrimaha Dibadda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 13aad faqrada (2), Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad Xarafka "E" ee Axdiga Federalka KMG ee J.S

**Markuu arkay:-** in ay jirto baahi loo qabo dhameystirka qaabdhismeedka Xukuumadda, iyo in ay lagama maarmaan tahay in la buuxiyo jagada bannaanaatay ee xilka Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Markuu hubsaday:-** Warqadda Sumad XRW/0000.865/08.11 ee ku taariikhsan 08/01/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeedadeeduna ahayd Magacaabid Wasiir ku xigeen

**Markuu tixgeliyay:-** aqoonta iyo waayo-aragnimada Marwada jagada soo socota loo magacaabayo:

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu xeerkaan saxiixo, waxaa Mudane Axmed Cumar Max'ud loo magacaabay Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Qodobka 2aad**

Wasiirku waxa uu xaq u yeelanaysaa wixii xuquuqda ay qaataan wasiirrada la midka ah ee uu Sharcigu tilmaamayo.

**Qodobka 3aad**

Dikreetadan waxay dhaqan galeysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.
MUQDISHO 05/02/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 033, taariikh 05/02/2011
**Magacaabid Agaasimaha Guud Wasaaradda Maaliyadda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "E" ee Axdiga FKMG

**Markuu arkay:-** in ay jirto baahi loo qabo dhameystirka qaab dhismeedka Wasaaradda Maaliyadda, ayna lagama maarmaan tahay in la Magacaabo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.

**Markuu hubsaday:-** Warqadda Sumad XRW/00000.22/01.11 ee ku taariikhsan 03/02/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeedadeeduna ahayd Magacaabid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda

**Markuu tixgeliyay:** - aqoonta iyo waayo-aragnimada Marwada jagada soo socota loo magacaabayo:

**Wuxuu soo saaray Xeerkan Maamul.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu xeerkaan saxiixo, waxaa marwo Aamina Sheekh Cismaan loo magacaabay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.

**Qodobka 2aad**

Marwada Agaasimaha ah waxay xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan shuruucda xaggasare ku xusan iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Dikreetadan waxay dhaqan galeysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO 05/02/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 037 taariikh 15/02/2011

**Burrin iyo dib uga noqosho Xukun**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qoraalka Hay'adda NRC Summad NRC/JFKMG/24/10 ee 22 Desember 2010, kuna saabsanaa ka Cabasho Caddaalad Darro.

**Markuu arkay:** Xukunka Maxkakamadda Gobolka Banaadir Lr. 02/10-BX ee 29/03/2010 iyo Xukunka Maxkamadda Sare Lr. 18/2010/BX ee 13/09/2010 iyo Xukunka dib u eegidda Maxkamadda Sare ee Dalka Lr. 21/2010/BX, iyo Xukunka Fulinta Maxkamadda Sare ee dalka Lr. 21/2010/BX, iyo Xukunka Fulinta Maxkamadda Gobolka Banaadir Lr. 09/10-GF ee 02/12/2010 iyo Dukumentiyo la xiriira xukunada kor ku qoran.

**Markay u caddaatay:** In Hay'adda NRC aysan dhinac ka ahayn dhammaan dacwadaha darajada 1aad, 2aad iyo 3aadba marka laga reebo dacwada dib u eegidda Maxkamadda Sare taasoo aan sharci ahayn in lagu soo daro heerkaas wax muuqda oo la cuskanayana aysan jirin.

**Markuu arkay:** Sharciga Lr. 9 ee 01 March 1974 iyo Sharciga Lr. 38 ee 04 April 1972.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Ahmiyadda ay leedahay Ilaalinta Danta Guud ee caddaaladda.

Wuxuu soo saaray xeerkan

**Qodobka 1aad**

Waxaa la baabi'iyay dhammaan xukunada kor ku qoran ee ka dhexeeya Shirkadda NRC, IFECO iyo FIDO ee la xiriira dayactirka Dugsiga Bartamaha

**Qodobka 2aad**

Waxaa la amrayaa Maxkamadda Sare in dacwadahaas ay dib u billowdo Maxkamadda itkhtisaaska gaarka u leh.

**Qodobka 3aad**

Dikreetadan waxay dhaqan galaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO: 15/02/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 038 taariikh 16/02/2011
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qodobada 39aad iyo 44aad ee Axdiga KMG ah

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad Faqradda 1aad Xarafka "J" ee Dastuurka 1961

**Markuu arkay:** Warqadda codsiga ee ay soo qoreen ehellada labada dhinac ee uu arrinku ka dhexeeyay iyo heshiiska ay magta ku kala qaateen oo ku saabsan in cafis loo fidiyo Maxbuus-Burhaan Muuse Xasan

**Wuxuu soo saaray xeerkan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay February 16, 2011 waxaa cafis loo fidiyay Maxbuuska magaciisa hoos ku qoran yahay:

1. Maxbuus Burhaan Muuse Xasan ina Maryan Jaamac

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo madaxweynaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO: 16/02/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 052, taariikh 23/02/2011
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalku mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida, dibna loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida ciidan ee jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa G/le Sare Maxamuud Maxamed Xasan loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda
MUQDISHO 23/02/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 053 taariikh 24/02/2011
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qodobada 39aad iyo 44aad ee Axdiga KMG ah

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad Faqradda 1aad Xarafka "J" ee Dastuurka 1961

**Markuu arkay:** Codsiga ay soo qoreen ehellada Maxbuus L/X/Le Cabdulqaadir Max'ed Abshir oo ku xiran Xabsiga dhexe, Codsigaas oo ku saabsan in cafis loo fidiyo Maxbuuskaas

**Wuxuu soo saaray xeerkan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay February 24, 2011 waxaa cafis loo fidiyay Maxbuuska magaciisa hoos ku qoran yahay:

1. Maxbuus L/X/Le Cabdulqaadir Max'ed Abshir ina Anbiyo Xuseen Afey

**Qodobla 2aad**

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo madaxweynaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
MUQDISHO: 09/01/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 1aad** Muqdisho, 1 Maarso 2011 L. 3

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa \$2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa \$50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa \$ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 068, taariikh 08/03/2011 - **Dallacsiin Saraakiil** **Bog.** 18

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
**Lr. 079, taariikh 24/03/2011 - Dallacsiin Sarkaal** » 19

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
**Lr. 080, taariikh 24/03/2011- Dallacsiin Sarkaal** » 20

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
**Lr. 086, taariikh 29/03/2011 - Dib ugu noqosho Magacaabiddii Guddoomiyaha Maxkamadda Sare** » 21

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
**Lr. 087, taariikh 30/03/2011 - Magacaabid Taliyaha Ciidamada Xoogga dalka Soomaaliya** » 22

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
**Lr. 088, taariikh 30/03/2011 - Magacaabid Taliyaha Ciidamada Booliska Soomaaliyeed** » 23

---

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 068, taariikh 08/03/2011; Dallacsiin Saraakiil**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Taliyaha Hay'adda Nabad sugidda Qaranka, summad HNQ/025/2011/ HNQ/0262011, ku taariikhsan 06/03/2011.

**Markuu tixgeliyay:** Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo xeerkan waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo tiradoodu dhan tahay 33 (Soddon iyo saddex) loo dallacsiiyay ama loo qiimeeyay midba darajada ku hor qoran magaciisa.

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | G/dhexe Xasan Cali Maxamed ................ | Darajada | G/Sare |
| 2. | Dhamme Cabdalla Cabdalla Maxamed ... | " | Gaashaanle |
| 3. | L/X/Le Ibraahim Max'ed Jimcaale ......... | " | Dhamme |
| 4. | Cabdulqaadir Max'ed Cusmaan............. | " | " |
| 5. | Saciid Xasan Faarax .......................... | " | " |
| 6. | Shukri Maxamed Xariif........................ | " | " |
| 7. | Maxamed Bukhaari Axmed ................. | " | " |
| 8. | Max'ed Sheekh Nuur Baaruud Gurxan...... | " | " |
| 9. | Maxamed Sheekh Ibraahim .................. | " | " |
| 10. | Aadan Cabdi Wayax ........................... | " | " |
| 11. | Cabdisalaam Maxamed Nuur................. | " | " |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 12. | Mukhtaar Ibraahim Isaaq...................... | " | " |
| 13. | Cabdicasiis Mukhtaar Maxamed............. | " | " |
| 14. | Cabdullaahi Muxiyadiin Maxamed........... | " | " |
| 15. | Maxamed Samaani Maxamed................. | " | " |
| 16. | CABDIRISAAQ Xasan Cabdi ..................... | " | " |
| 17. | Naciimo Cabdullaahi Xuseen................. | " | " |
| 18. | Farxiyo Abuukar Maxamed ................ | " | " |
| 19. | Maxamuud Cusmaan Axmed................. | " | " |
| 20. | X/Le Liibaan Cabdullaahi Cusmaan......... | " | " |
| 21. | " C/raxmaan Cali Nuur.................... | " | " |
| 22. | " Maxamed Xasan Nuur................. | " | " |
| 23. | " Maxamuud Axmed Xasan ............ | " | " |
| 24. | " Cabdullaahi Xuseen Axmed.......... | " | " |
| 25. | " Cabdikariim Cumar Kulmiye......... | " | " |
| 26. | " Yaasiin Macallin Muxiyadiin......... | " | " |
| 27. | " Saciid Axmed Cilmi.................... | " | " |
| 28. | " Cabdixakiim Xasan Xaashi............ | " | " |
| 29. | " Cabdirisaaq Maxamed Cabdi......... | " | " |
| 30. | K/S Maxamed Xasan Cali.................... | " | X/Le |
| 31. | " Zakariye Daahir Maxamuud............ | " | " |
| 32. | " Xasan Rooble Xasan.................... | " | " |
| 33. | " Aamino Xuseen Xasan.................. | " | " |

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 08/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 079, taariikh 24/03/2011;**
**Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalku mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Dhamme Nuur Maxamed Saalax loo qiimeeyay oo loo dallacsiiyay Darajada Gaashaanle.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 24/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 080, taariikh 24/03/2011; Dallacsiin Sarkaal**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "F" & Qodobka 71aad Faqrada 2aad ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu tixgeliyay:** Mudnaanta uu sarkaalku mudan yahay Dallacsiin iyo Baahida loo qabo in la dardar geliyo dhisidda Ciidamada Qalabka Sida dib loo habeeyo loona helo saraakiil daboosha baahida jirta

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Dhamme Cusmaan Xasan Cosoble (Labaatanjirow) loo qiimeeyay oo loo dallacsiiyay Dhamme.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 24/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 086, taariikh 29/03/2011;**
**Dib ugu noqosho Magacaabiddii Guddoomiyaha Maxkamadda Sare**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "D" & ee Axdiga FKMG Soomaaliyeed

**Markuu arkay: -** Xeer nidaamiyaha Garsoorka Lr. 3 ee soo baxay 22ka June 2009.

**Markuu arkay: -** Warqadda go'aanka ee Golaha Wasiirrada ee Lr. XRW/00000.201.11ee 30 January 2011, go'aankaasi oo ku saabsan u magacaabidda Mudane Xuseen Cabdi Cilmi xilka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

**Markuu arkay: -** Qodobka 7aad xarafka "b" ee xeer nidaamiyaha Xukuumadda (Law of Government Organization) Lr. 14 ee soo baxay 3da June 1962, xeerkaasi oo si cad u tilmaamaya inay Golaha Wasiirrada soo jeedinayaan magacaabidda Xubnaha Maxkamadda Sare, Xeer Ilaaliyaha Guud, Hanti Dhowraha & Garyaqaanka Guud.

**Markii uu dib u eegay:** Xeerka Madaxweynaha J.S ee Lr. 031 ee 5ta February 2011.

**Wuxuu Madaxweynaha J.S soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo xeerkaan in laga noqday u magacaabidda Mudane Xuseen Cabdi Cilmi xilka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare bacdamaa iska hor imaanayaan xilka uu haatan Qaranka u hayo oo ah in uu yahay Xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka iyo Hawsha Guddoomiyanimada Maxkamadda Sare.

**Qodobka 2aad**

Waxaa kaloo caddaatay inay ka maqan tahay taariikh nololeedkiisa (CV) muddada waayo aragnimada sharci ahaan looga baahan yahay xilka Guddoomiyanimada Maxkamadda Sare.

**Qodobka 3aad**

Waxaa kale oo laga noqday wixii xuquuq ah oo uu ku yeelan lahaa xilka Guddoomiyanimada ee Maxkamadda Sare ee Dalka.

**Qodobka 4aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 29/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 087, taariikh 30/03/2011;**
**Magacaabid Taliyaha Ciidamada Xoogga dalka Soomaaliya**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 1aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "e" ee Axdiga FKMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** Xaaladda Nabad gelyo ee uu dalku marayo iyo baahida loo qabo dhisidda Ciidamada Qalabka sida.

**Markuu tixgeliyay: -** Soo gudbinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed XRW/00000.487./03,11 taariikh 29/03/011 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu arkay:** Jagada Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo bannaan oo ay waajib tahay in la buuxiyo si ay dani ugu jirto Maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweyuhu xeerkan saxiixo waxaa G/Sare Cabdulqaadir Sheekh Cali Diini loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto, iksla markaana waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Taliyaha wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah oo xeerka ciidamadu tilmaamayo.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S.
Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 30/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

**XEER MADAXWEYNAHA J.S.- Lr. 088, taariikh 30/03/2011;**
**Magacaabid Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:-** Qodobka 39aad faqrada 1aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "e" ee Axdiga FKMG ee J.S.

**Markuu garwaaqsaday:** Xaaladda Nabad gelyo ee uu dalku marayo iyo baahida loo qabo dhisidda Ciidamada Qalabka sida.

**Markuu tixgeliyay: -** Soo gudbinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed XRW/00000.488./03,11 taariikh 29/03/2011 ee ka soo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu arkay:** Jagada Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed oo bannaan oo ay waajib tahay in la buuxiyo si ay dani ugu jirto Maslaxadda Ummadda Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweyuhu xeerkan saxiixo waxaa G/Sare Shariif Sheekhunaa Maye loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto, iksla markaana waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Taliyaha wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah oo xeerka ciidamadu tilmaamayo.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

MUQDISHO 30/03/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho, 1 April 2011 L. 4

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 092, taariikh 03/04/2011- *Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka J.S* *Bog.* 24

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 105, taariikh 24/04/2011- *Magacaabid Taliye Ku-Xigeenka koowaad ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed* » 26

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 109, taariikh 23/04/2011- *Magacaabid Garyaqaanka Guud ee Dawladda* » 27

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 092, taariikh 03/04/2011

**Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka J.S**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 44aad Faqrada 1aad Xarafka "d" ee Axdiqarameedka Dawladda Federalka kumeelgaarka

**Markuu arkay: -** Qodobka 59aad faqrada 3aad xarafka "a & b" ee Axdi Qarameedka Dawladda Federaalka oo qeexaya shuruudaha laga rabo in uu buuxiyo qofka loo magacaabayo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

**Markuu tixgeliyay:-** Soo jeedinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare dalka summad XRW/0000.512/05/11, taariikh 22/05/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu fiiriyay: -** Talada iyo Go'aanka Guddiga Adeega Garsoorka ee 06/12/2010

**Markuu xaqiiqsaday:** In ay jirto baahi loo qabo dhameystirka Qaab-dhismeedka Nidaamka Garsoorka Soomaaliyeed & Danta Guud ee Caddaaladda.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu xeerkaan saxiixo ayaa waxaa Mudane Avv. Caydiid Cabdullaahi Ilka Xanaf loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee dalka J.S.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Guddoomiyaha ah waxa uu xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga Sare ku xusan & Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO 03/04/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 105, taariikh 24/04/2011

**Magacaabid Taliye Ku-Xigeenka koowaad ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad faqrada 1aad xarafka "b", Qodobka 44aad faqrada 1aad "e" ee Axdiga Federaalka KMG ee J.S.

**Markuu qiimeeyay: -** Xaaladda Nabad gelyo ee uu dalku marayo iyo Baahida loo qabo in la dhammeystiro Dib-U-Hesiisiinta iyo dhisidda ciidamada Qalabka Sida.

**Markuu tixgeliyay:-** Soo jeedinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Taliye Ku-Xigeenka koowaad ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed XRW/00000.488/03/11, taariikh 29/03/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu J.S. saxiixo xeerkaan, waxaa Mudane G/le Sare C/xakiim Daahir Saciid loo dallacsiiyay S/Guuto, isla markaana waxaa loo magacaabay Taliye Ku-Xigeenka Koowaad ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Taliye Ku-xigeenka ah wuxuu xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda Xagga Sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo.

**Qodobka 3aad**

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO 24/04/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 109, taariikh 23/04/2011

**Magacaabid Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay:** Qodobka 13aad, faqradda (1) Xarafka (E), Qodobka 39aad faqrada (2) iyo Qodobka 44aad Faqrada (1) xarafka "D" ee Axdiga Federaalka KMG ee J.S.

**Markuu tixgeliyay:** Soo jeedinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Garyaqaanka Guud ee Qaranka XRW/00000.804/04/11, taariikh 23/04/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu garwaaqsaday:** In ay jirto baahi loo qabo dhammeystirka qaab dhismeedka Nidaamka kaabayaasha Dawladda, iyo lagama maarmaanimada in la helo Xafiis Garyaqaan si loo waafaqo Axdiga Federaalka KMG iyo Shuruucda Dalka.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu J.S. saxiixo xeerkaan, waxaa Mudane Avv. Xasan Cali Xayle loo magacaabay Garyaqaanka Guud ee Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Garyqaanku wuxuu xaq u yeelanaysaa wixii xuquuq ah oo uu kafaalo qaadayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

MUQDISHO 23/04/2011

Madaxweynaha J.Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad     Muqdisho, 1 May 2011     L. 5

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 77, taariikh 16 May 2011 - *Hawl ka joojin La taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Bangiyada iyo soo Celinta Hantida Qaranka* *Bog. 31*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 112, taariikh 01/05/2011- *Cafis Maxbuus* *» 31*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 123, taariikh 10/05/2011- *Cafis Maxaabiis* *» 33*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 135, taariikh 24/05/2011- *Magacaabid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda* » 34

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 136, taariikh 26/05/2011- *G/Sare C/xakiim Daahir Saacid* » 35

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 137, taariikh 27/05/2011- *Magacaabis Taliye Ku-Xigeenka Hay'adda Nabad-Sugidda Qaranka* » 36

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 139, taariikh 22/05/2011- *Magacaabid Guddoomiye ku xigeenka Gobolka Banaadir Xagga Arrimaha Siyaasadda* » 37

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 142, taariikh 24/05/2011 - *Oggolaansho Fulin Xukun dil Toogasho* »38

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 143, taariikh 24/05/2011 - *Dib ugu Celin Dacwad Maxkamadaha iyo Garsoorka* » 39

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 144, taariikh 24/05/2011 - *Cafis Maxaabiis* » 40

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOIOMAALIYA
Lr. 145, taariikh 24/05/2011- *Magacaabid Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka* » 41

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 77, taariikh 16 May 2011
**Hawl ka joojin La taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Bangiyada iyo soo Celinta Hantida Qaranka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 13aad, Faqrada (1) Xarafka (E), Qodobka 39aad, Faqrada 2aad, Qodobka 44aad, Xarafka "D" iyo qodobka 71aad Xarafka 2aad ee Axdiga Federalka KMG ee J.S.

**Markuu la xaqiijiyay: -** In la taliyuhu ka baxay xuduuddii Masuuliyadiisa

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynuhu xeerkan saxiixo waxaa Mudane Cali Cabdi Camalow laga joojiyey xilkii horay loogu magacaabay ee ahaa La-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Bangiyada iyo soo celinta Hantida Qaranka.

Qodobka 2aad

Dikreetada waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.S.

Muqdisho 16, May 2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 112, taariikh 01/05/2011
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqrada 1aad Xarafka "c" iyo faqradda 2aad iyo Qodobka 71aad ee Axdiga KMG ee J.S.

**Markuu arkay: -** Qodobka 75aad ee Dastuurka 1960kii.

**Markuu arkay: -** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. MCQS/12/ taariikh 29/03/2011

**Markuu dhageystay:** Talada La-taliyaha Madaxweynaha Arrimaha Dastuurka iyo Sharciyada Dalka.

**Markuu arkay: -** Qodobka 221 XCS iyo Qodobka 1aad XCQS

**Markuu arkay: -** Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 38 ee soo baxay 5ta April 1972 iyo Qodobka laad ee Sharci Lr. 9 ee soo baxay 1974.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu Madaweynaha J. S. ka cafiyay maanta oo ah 1da May 2011 Faadumo Max'ed Xasan ina Khadiija Max'ud, denbiga ay Maxkamadda CQS ay ku xukuntay eek u xusan Qodobka 221 XCS iyo Qodobka 1aad ee XCQS.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in si deg-deg ah looga sii daayo Xabsiga Maxbuusad Faadumo Max'ed Xasan.

**Qodobka 3aad**

Waxuu xeerkan dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 01/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 123, taariikh 10/05/2011
**Cafis Maxaabiis**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqrada 1aad Xarafka "c" iyo faqradda 2aad iyo Qodobka 71aad ee Axdiga KMG ee J.S.

**Markuu arkay: -** Qodobka 75aad ee Dastuurka 1960kii.

**Markuu arkay: -** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. MCQS/204/ taariikh 02/03/2011

**Markuu dhageystay:-** Talada La-taliyaha Madaxweynaha Arrimaha Dastuurka iyo Sharciyada Dalka.

**Markuu arkay: -** Qodobka 221 XCS iyo Qodobka 1aad XCQS

**Markuu arkay: -** Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 38 ee soo baxay 5ta April 1972 iyo Qodobka 1aad ee Sharci Lr. 9 ee soo baxay 1974.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Wuxuu Madaweynaha J.S. ka cafiyay maanta oo ah 10ka May 2011

1. Sheekh Cali Max'ed Samatar
2. CabdiXasan Aadan
3. C/qaadir Yuusuf Sahal

dembiga ay Maxkamadda CQS ay ku xukuntay ee ku xusan Qodobka 221 XCSiyo Qodobka 1aad ee XCQS

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in laga sii daayo xabsiga Maxaabiistaasi.

**Qodobka 3aad**

Waxuu xeerkan dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 10/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 135, taariikh 24/05/2011
**Magacaabid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqrada 2aad, Qodobka 44aad faqrada 1aad Xarafka "e" ee Axdiga FKMG.

**Markuu arkay: -** In ay jirto baahi loo qabo dhammeystirka qaab dhismeedka Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ayna lagama maarmaan tahay in la magacaabay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Markuu tixgeliyay: -** Soo Gudbinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee magacaabidda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dibadda, summad XRW/00000.898/05.11 taariikh 07/05/2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu tixgeliyay:-** Aqoonta iyo waayo-aragnimada Mudanaha jagada soo socota loo magacaabayo.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo waxaa Mudane Cismaan Max'ed Aadan loo magacaabay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Agaasimaha ah wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan shuruucda xagga sare ku xusan & Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Dikreetadan waxay dhaqan galaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 136, taariikh 26/05/2011
**G/Sare C/xakiim Daahir Saacid**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 44aad Faqrada laad Xarafka "e" ee Axdiga Federaalka KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu qiimeeyay:** Baahida loo qabo in la dhammeystiro dhisidda Ciidamada Qalabka sida iyo iyo Xaaladda Nabad gelyo ee dalku marayo.

**Markuu tixgeliyay: -** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Amniga Qarankasummad WAG&AQ/XW/092/11 taariikh 28/03/2011 ee Magacaabidda Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo waxaa G/Sare C/xakiim Daahir Saacid loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto, isla markaana waxaa loo magacaabay Taliye Ku-Xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

**Qodobka 2aad**

Waxaa la tir-tiray Dekreeto Madaxweyne ee Lr. 105, taariikh 14/04/2011, maadaama Sharciga iyo Xeerka Boolisku ay qeexayaan in Saraakiisha Booliisku u kala horreeyaan (Seniority) sida ay dallacaadda ama Shaqada Booliska ugu soo kala horreeyeen.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 26/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 137, taariikh 27/05/2011
**Magacaabis Taliye Ku-Xigeenka Hay'adda Nabad-Sugidda Qaranka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "b", Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" ee Axdiga Federaalka KMG ee J.S.

**Markuu arkay: -** Soo jeedinta Taliyaha KMG ee Hay'adda Nabad-Sugidda Qaranka Summad X.T.C/HNQ/645/2011 ee Magacaabidda Taliye Ku-Xigeen.

**Markuu qiimeeyay: -** Baahida loo qabo in la dhammeystiro dhisidda Ciidamada Nabad-Sugidda Qaranka iyo Xaaladda Nabadgelyo ee dalku marayo.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo waxaa G/Sare Xasan Cali Max'ed loo dallacsiiyay Darajada S/Guuto, isla markaana loo magacaabay Taliye Ku-Xigeenka Hay'adda Nabad-Sugidda Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Taliye Ku-Xigeenka ah wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan shuruucda xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo Xeerka Ciidamadu tilmaamayo.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 27/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 139, taariikh 22/05/2011

**Magacaabid Guddoomiye ku xigeenka Gobolka Banaadir Xagga Arrimaha Siyaasadda**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 2aad, Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" ee Axdiga FKMG

**Markuu arkay: -** In ay jirto baahi loo qabo dhammeystirka qaab dhismeedka Gobolka Banaadir, ayna lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddoomiye ku xigeenka Gobolka Banaadir Xagga Arrimaha Siyaasadda.

**Markuu tixgeliyay: -** Soo Gudbinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Banaadir Xagga Arrimaha Siyaasadda, summad XRW/0000044/05/11 taariikh 22.05.2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu tixgeliyay: -** Aqoonta iyo waayo-aragnimada mudanaha jagada soo socota loo magacaabayo.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan Saxiixo waxaa mudane Cali Axmed Guure loo magacaabay Guddoomiye Ku-Xigeenka Gobolka Banaadir Xagga Arrimaha Siyaasadda.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Guddoomiye Ku-Xigeenka ah wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan shuruucda xagga sare ku xusan & Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 22/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 142, taariikh 24/05/2011
**Oggolaansho Fulin Xukun dil Toogasho**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "c" iyo Qodobka 71aad Faqradda 2aad ee Axdiga FKMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

**Markuu arkay: -** Qodobka 47aad Xeerka Habka Ciqaabta ee CQS

**Markuu arkay: -** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. MCQS/496 ee 30/04/2011

**Markuu dhageystay: -** Talada La-taliyaha Madaxweynaha Arrimaha Dastuurka iyo Sharciyada dalka.

**Markuu arkay: -** Qodobka 434 XCS iyo Qodobka 19aad faqradda 1aad ee XCCQS.

**Markuu arkay: -** Dekreetada Madaxweynaha GSK ee Nidaamka Fulinta Dil Toogasho ah Go'aanka Maxkamadda CQS ee ku saabsan Nidaaminta Dil Toogasho Lr. 6 ee soo b axay 30ka Octoobar 1969kii.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Madaxweynaha isagoo tixraacayo Go'aanka Maxkamadda CQS ay gaartay 30ka April 2011 in uu Xeer-Ilaaliyaha Maxkamadda CQS uu si deg-deg ah ugu fuliyo Gacan ku Dhiigle Cabdi C/laahi Dhuxul Rooble go'aanka kor ku xusan isla markaana uu iclaamiyo taariikhda iyo Meesha fulinta Dilka Toogasho.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 143, taariikh 24/05/2011
**Dib ugu Celin Dacwad Maxkamadaha iyo Garsoorka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 54aad ee Axdiga Dowladda Federaalka KMG oo qeexaya in awooda garsoorka iska leeyihiin Maxkamadda J.S.

**Markuu arkay:-** Qodobka 55aad Faqradda 1aad oo caddeynaya in garsoorku hawlihiisa uu uga madax bannaan yahay Hay'adda kale ee Dowladda.

**Markuu aqoonsaday:-** In Dacwadda ka dhexeysay Shirkadaha FIDO iyo IPECO/NRC, ay Maxkamadda Sare ka gaartay go'aan dib eegiseed.

**Markay u muuqatay: -** In Maxkamadda Gobolka Banaadir ay gaartay go'aan GL.09/10-GF ee 13/02/2011 lagu fulinaayo xukunkii ugu dambeeyay ee Maxkamadda Sare ee dib u eegisteeda Lr. 21/2010 BX ee 13/9/2010.

**Markuu aqoonsaday:-** In sharci Lr. 9 ee 01 March 1974tii, iyo Sharci Lr. 38 ee 04 April 1972 aanay waafaqsanayn lana soconin kana hor imaanayaan cutubka 9aad ee Axdi Qaramecdka Dawladda Federaalka KMG ah.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa dib loogu celiyay Maxkamadaha Jamhuuriyadda iyo Garsoorka Dacwadda u dhaxeysa Shirkadaha FIDO iyo IPECO/NRC, waxaana la farayaa Maxkamadaha in ay xukunnada la xiriira Dacwadda u dhaxeysa dhinacyada sare ku xusan u fuliyaan si waafaqsan sharciga.

**Qodobka 2aad**

Waxaa la tir-tiray Xeer Madaxweyne Lr. 037 ee 15/02/2011 ee ahaa Burrin iyo dib u noqosho Xukun.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 144, taariikh 24/05/2011
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "c" iyo Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ee J.S.

**Markuu arkay:-** Qodobka 71aad Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ah ee J.S.

**Markuu arkay: -** Qodobka 75aad ee Dastuurka 1960kii.

**Markuu dhageystay: -** Talada La-taliyaha Madaxweynaha Arrimaha Dastuurka iyo Sharciyada dalka

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 221 ee XCS iyo Qodobka 1aad ee XCCQS. |
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 38 ee soo baxay 5ta April 1972 iyo Qodobka 1aad ee Sharci Lr.9 ee soo baxay 1974. |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S cafis u fidiyay eedeysane C/kariim Max'ed Dharfe ina Xaliimo Maxamed Urur, laga bilaabo maanta oo Talaado ah taariikhduna tahay 24/05/2011.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in laga sii daayo Xabsiga Maxbuuskaasi.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 145, taariikh 24/05/2011
**Magacaabid Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad Sugidda Qaranka**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 39aad Faqradda 2aad, Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "E" ee Axdiga FKMG. |
| **Markuu arkay:-** | In ay jirto baahi loo qabo dhammeystirka qaab dhismeedka Hay'adda Nabad-sugidda Qaranka, ayna lagama maarmaan tahay in la magacaabo Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabadsugidda Qaranka. |

**Markuu tixgeliyay:-** Soo gudinta Go'aanka Golaha Wasiirrada ee Magacaabidda Agaasimaha Guud ee Hay'adda Nabad-Sugidda Qaranka, summad XRW/00000.69/05.11 taariikh 24.05.2011 ee ka soo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

**Markuu tixgeliyay: -** Aqoonta iyo waayo-aragnimada mudanaha jagada soo socota loo magacaabayo.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka laad**

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynuhu Xeerkan saxiixo waxaa Mudane Axmed Macallin Fiqi Axmed loo magacaabay Agaasimaha Guud ee Hay'ada Nabadsugidda Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Mudanaha Agaasimaha ah waxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah oo ay kafaalo qaadayaan shuruucda Xagga sare ku xusan & Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dalka.

**Qodobka 3aad**

Dikreetadan waxay dhaqan galaysaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/05/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

KU DHAQAN XAFIIS D.


# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الرسمية الجريدة

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho, 1 June 2011 L. 6


**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER


XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 145, taariikh 18/06/201- *Cafis Maxbuus* *Bog 44*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 146, taariikh 23/06/2011- *Magacaabis Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federalka KMG* *» 45*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 152, taariikh 25/06/2011- *Cafis Maxbuus* *» 47*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 145, taariikh 18/06/2011

**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "c" iyo Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ee J.S.

**Markuu arkay:-** Warqadda Xukunka Maxkamadda Lr/MCQS/38/2010 ee 25ta January 2010 iyo Warqadda heshiiska labada beelood ee dhibku kala gaaray kuna heshiiyay diyo in ay kala qaataan.

**Markuu arkay: -** Qodobka 221 XCQ iyo Qodobka 1aad XCQS.

**Markuu arkay:-** Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 38 ee soo baxay 5ta April 1972 iyo Qodobka 1aad ee Sharci Lr.9 ee soo baxay 1974.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S jebiyay maanta oo ah 18, June 2011 Xukunka ah DIL TOOGASHO oo ay Maxkamadda CQS ay ku ridday Xukunsane D/le Siidii Cismaan Xasan.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S. laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18 June 2011 cafis u fidiyay Maxbuus D/le Siidii Cismaan Xasan ina Shariifo Macallin Xasan, waxa uuna farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in laga sii daayo Xabsiga.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 18/06/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 146, taariikh 23/06/2011

**Magacaabis Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federalka KMG**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 2aad iyo Qodobka 44aad Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ah.

**Markuu iscasilay:-** Ra'iisul Wasaarihii Xukuumadda Federalka KMG ah Mudane Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo) oo uu Madaxwenuhu ka aqbalay ISTIQAALADA sida ku qoran qodobka 50aad faqraddiisa 1aad iyo 2aad ee Axdiga KMG.

**Markuu la tashaday: -** Mas'uuliyiinta Hay'adaha Dawladda ee ku aaddan Magacaabidda Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda KMG ah.

**Markuu garwaaqsaday:-** In la magacaabo Ra'iisul-Wasaare cusub ee Xukuumadda Federaalka KMG ah.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Mudane Cabdiwali Maxamed Cali loo magacaabay inuu noqdo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka KMG ah.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 23/06/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 152, taariikh 25/06/2011

**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "c" iyo Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ee J.S. |
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 71aad Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ee J.S |
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 75aad ee Dastuurka 1960kii. |
| **Markuu Tixgeliyay:-** | Warqadda CodsigaWasiirka Wasaaradda Biyaha, Shidaalka Tamarta & Macdanta ee ujeedkeedu ahaa Cafis Maxbuus summad WPAE/WD/QRB/220611 kuna taariikheysan 22.06.2011. |
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 221 XCS iyo Qodobka 1aad XCQS. |
| **Markuu arkay: -** | Qodobka 3aad ee Sharci Lr. 38 ee soo baxay 5ta April 1972 iyo Qodobka 1aad ee Sharci Lr. 9 ee soo baxay 1974 |

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S cafis u fidiyay eedeysane D/Le Ibraahim Xasan ina Xabiibo Xuseen Suurey, laga bilaabo maanta oo Sabti ah taariikhduna tahay 25/06/2011.

## Qodobka 2aad

Waxuu Madaxweynaha J.S farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in laga sii daayo Xabsiga Maxbuuskaas.

## Qodobka 3aad

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 25/06/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

***W. M***

---------------------------

KU DHAQAN XAFIIS D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL BULLETIN
# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 1aad Muqdisho, 1 Luulyo 2011 L. 7

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimadu: Waa $2 Doollar lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa $20 Doollar Soomaaliya gudaheeda – dibaddeedana waa $50 Doollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1[da] Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo waxii ka yar waa $ 0.20 doollar – Rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

*W. M*

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 157, taariikh 14/07/2011 - *Magacaabid Guddoomiyaha Shirkadda SHIFCO* *Bog. 50*

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 162, taariikh 20/07/2011 - *Magacaabid Wasiirrada Xukuumadda Federaalka KMG* » 51

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 164, taariikh 24/07/2011 - *Magacaabis Nootaayo* » 53

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 165, taariikh 24/07/2011- *Magacaabis Nootaayo* » 53

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 166, taariikh 25/07/2011- *Cafis Maxbuus* » 54

XEER MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Lr. 169, taariikh 26/07/2011- *Magacaabis Wasiirka Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska* » 55

---

## BOGGA SEDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### *W. M*

---

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 157, taariikh 14/07/2011
**Magacaabid Guddoomiyaha Shirkadda SHIFCO**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" ee Axdiga KMG ah.

**Markuu arkay:-** Qodobka 1aad ee Xeerka Lr. 5 ee 2da Febraayo 1980 kuna saabsan Nidaamka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.

**Markuu arkay: -** Xeer Madaxweyne Lr. 018 ee 9ka Janaayo 2011 kuna saabsan Magacaabid Maareeyaha Shirkadda SHIFCO

**Markuu arkay:-** Soo jeedinta Wasiirka Kalluumaysiga ee ku xusan warqadda Lr. MFMRE/T/12/11 ee 2da Luulyo 2011

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan.**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Capt. Maxamuud Xuseen Mooge loo magacaabay Guddoomiyaha Shirkadda SHIFCO, waxuuna hawshiisa ka fulinayaa magaalada Muqdisho.

**Qodobka 2aad**

Waxii xuquuq ah iyo maamuus waxaa lagu dhaqayaa Xeer-Nidaamiyaha Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 14/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya
*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 162, taariikh 20/07/2011
**Magacaabid Wasiirrada Xukuumadda Federaalka KMG**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad, Faqradda 2aad, Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" EE Axdiga KMG ee J.S

**Markuu tixgeliyay:-** Soo jeedinta Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federalka KMG ee ku sumadeysan XRW/00000.690/07.2011 kuna taariikhsan 20/07/2011.

**Markuu arkay: -** Qodobka 46aad faqraddiisa 5aad ee Axdiga KMG

**Markuu garwaaqsaday:-** Baahida loo qabo in la dhiso Golaha Xukuumadda Kaddib markii ay dhacday Xukuumaddii hore lana magacaabay Ra'iisul Wasaare cusub si looga samatabixiyo xaaladda adag oo ay dalka iyo dadkaba marayaan.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda**

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu madaxweynuhu saxiixo Dekreetadan waxaa la magacaabay Wasiirrada Xukuumadda Federaalka KMG ah ee J.S waxaana Wasiirrada hoos ku qoran loo magacaabay Wasiir waliba Wasaaradda ku hoos qoran.

1. Mudane Axmed Xasan Gaboobe (Ugaas Bile) waxsaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Awqaafta.
2. Mudane Maxamed Maxamuud Xaaji Ibraahim waxaa loo magacaabay Ra'iisul Wasaare ku-xigeen ahna Wasiirka Arrimaha Dibadda
3. Mudane Xuseen Carab Ciise waxaa loo magacaabay Ra'iisul-Wasaare ku-xigeen ahna Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

4. Mudane Cabdiwahaab Ugaad Xuseen Ugaas Khaliif waxaa loo magacaabay Ra'iisul Wasaare ku-xigeen ahna Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha.
5. Mudane Cabdisamad Macallin Maxamuud Sheekh Xasan waxaa loo magacaabay Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka.
6. Mudane Dr. Cabdinaasir Maxamed Cabdulle waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda & Lacagta.
7. Marwo Caasho Cismaan Caqiil waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska.
8. Mudane Cabdullaahi Xaaji Xasan Nuur waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Beeraha & Xanaanada Xoolaha.
9. Mudane Dr. Cabdicasiis Sheekh Yuusuf waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.
10. Mudane Cabdulqaadir Maxamed Axmed waxaa loo magacaabay WasiirkaWasaaradda Warfaafinta, Boostada & isgaarsiinta.
11. Mudane Maxamed Muxiyadiin Sheekh Mursal waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Shaqada, dhallinyarada & Isboortiga.
12. Mudane Cabdiraxmaan Sheekh Ibraahim waxaa loo magacaabay Wasiirka Kalluumaysiga, Kheyraadka Badda iyo Bay'adda.
13. Mudane Aadan Cabdullaahi Aadan waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka, Cirka, Dhulka, Badda & Dekadaha.
14. Mudane Avv. Cabdiraxmaan Xoosh Jibriil waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Dastuurka & Dib-u-heshiisiinta.
15. Mudane Jeylaani Nuur Iikar waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeenta & Dib-u-dhiska.
16. Mudane Cabdulqaadir Maxamed Dhicisow waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Macdanta, Biyaha & Batroolka.
17. Mudane Prof. Axmed Caydiid Ibraahim waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare.
18. Mudane Cabdullaahi Goodax Barre, waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 20/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 164, taariikh 24/07/2011
**Magacaabis Nootaayo**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ah.

**Markuu arkay:-** Qodobka 1aad ee Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 2da Maarso 1962, kuna saabsan Nidaamka Nootaayaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 2da Febraayo 1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha in uu si toos ah u magacaabo Notaayaha.

**Markuu arkay: -** Codsiga Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib ee 1da June 2011.

**Markuu arkay: -** Soo jeedinta Wasiirka Caddaaladda summadda XWGAAD/G-1/186/2011 ee ku taariikheysan 30ka June 2011.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib loo magacaabay Nootaayo, waxuuna hawshiisa ka fulinayaa magaalada Muqdisho.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 165, taariikh 24/07/2011
**Magacaabis Nootaayo**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 2aad ee Axdiga KMG ah.

**Markuu arkay:-** Qodobka 1aad ee Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 2da Maarso 1962, kuna saabsan Nidaamka Nootaayaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 2da Febraayo 1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha in uu si toos ah u magacaabo Notaayaha.

**Markuu arkay: -** Codsiga Dr. Maxamed Diiriye Sebriye

**Markuu arkay: -** Soo jeedinta Wasiirka Caddaaladda summadda XWGAAD/D-9/0062/2011 ee ku taariikhcysan 15ka March 2011.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda**

**Qodobka 1aad**

Waxaa Dr. Maxamed Diiriye Sebriye loo magacaabay Nootaayo, waxuuna hawshiisa ka fulinayaa magaalada Muqdisho.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 166, taariikh 25/07/2011
**Cafis Maxbuus**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 1aad Xarafka "c" ee Axdiga KMG ee J.S.

**Markuu arkay:-** Xukunka Maxkamadda CQS Lr. MCQS/204 ee 02.03.2011

**Markuu arkay: -** Qodobka 372 ee XCCQS

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda**

**Qodobka 1aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S cafis u fidiyay eedeysane Xasan Daahir Geedi Mataan ina Cariifey Geedi Gaadaaye, laga bilaabo maanta oo Sabti ah taariikhduna tahay 24/07/2011.

**Qodobka 2aad**

Waxuu Madaxweynaha J.S farayaa isagoo soo xiganaayo Qodobbada kor ku xusan in laga sii daayo Xabsiga Maxbuuskaas.

**Qodobka 3aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 24/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*

XEER MADAXWEYNAHA J.S Lr. 169, taariikh 26/07/2011

**Magacaabis WasiirkaWasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Markuu arkay: -** Qodobka 39aad Faqradda 2aad, Qodobka 44aad Faqradda 1aad Xarafka "e" ee Axdiga KMG ee J.S

**Markuu tixgeliyay:-** Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka KMG ee ku sumadeysan XRW/00000.715/07.2011 kuna taariikhaysan 25/07/2011.

**Markuu arkay: -** Qodobka 46aad faqraddiisa 5aad ee Axdiga KMG.

**Markuu garwaaqsaday: -** In ay jirto baahi loo qabo dhammeystirka qaab-dhismeedka Xukuumadda, iyo in laga maarmaan tahay in la buuxiyo jagada bannaan ee xilka Wasiirka Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska.

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan soo socda**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka Madaxweynuhu saxiixo Dekreetadan waxaa Marwo Maryan Aweys Juma loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska.

**Qodobka 2aad**

Xeerkan waxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO 26/07/2011

Madaxweynaha J. Soomaaliya

*Shariif Sheekh Axmed*